IIB MA GALO


# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 15 Feb. 1980 — Lr. 1/R2

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA** : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.


*KOOBNIIN*

*QAYBTA KOOWAAD*

**SHARCI**


SHARCI L. 3 ee 16 Diseember 1979, Dhismaha Mashruuca Caanaha Banaadir Bogga 128


**QAYBTA LABAAD**

**XEER**


XEER WASAARADA H. GUUD L. 16 ee 8 Nofeember 1975, Cad dhul Dawladeed gadaty Jaalle Cawrala Faarax Cilim ku yaal Muqdisho Jidka Maka Al Mukarama Xaf. Hawl-Wadaag, kuna mq. 1.168. » 138

XEER WASAARADDA L. 17 ee 14 Jenaayo 1976, Dhul Dawladeed la siiyay gacantana loo geliyay Jaalleyaasha Faaduma Cismaaciil, Cali Cabdirisaaq Cusmaan Maxamuud, Cabdulaahi Cusmaan Maxamuud iyo Karuuro Cusmaan Maxamuud.

Wakaaladda M. Qaranka

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 3 ee 26 Diseember 1979 Dhismaha Mashruuca Caanaha Banaadir :

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lambarkiisu yahay 1 ee 21ka Oktoober 1969kii

ISAGOO ARKAY : Go'aanada Lambarkoodu kala yihiin 27/79 ee 17. 6. 1979 iyo 144/79 ee 30.6. 1979 oo ay wadajir u soo saareen Duqa Magaalada Muqdisho iyo Taliyaha Ciidammada Asluubta Soomaaliyeed.

ISAGOO U ARKAY lagama maarmaan in la mideeyo hal Mashruuc oo keli ahna la isugu geeyo lo'da, Xeryaha, Qalabka, Beeraha iyo Shaqaalaha Maamula ee D/Hoose iyo Ciidammadda Asluubta Soomaaliyeed.

ISAGOO DHEGAYSTAY : talo jeedinta «Duqa Magaalada Muqdisho iyo Taliyaha Ciidammadda Asluubta Soomaaliyeed.»

WUXUU SOO SAARAY

Qod. 1aad,

Dhismaha Mashruuca

1) Waxaa Sharcigan lagu dhisay Mashruuc ay shiraako ku yihiin (Joint Venture), 50% D/Hoose ee Muqdisho, iyo Ciidammadda Asluubta Soomaaliyeed hadda wixii ka dambeeyana loo Aqoonsan doono «* MASHRUUCA CAANAHA BANAADIR *» kaas oo si looga Gudbo dhibaatada Magaalada Muqdisho, ka haysata Caanaha La'aanta lagu mideeyey meelna la isugu keenay Dhammaan hantida, shaqaalaha iyo Xafiisyada hadda jira oo ay leeyihiin D/Hoose ee Muqdisho iyo Ciidammada Asluubta Soomaaliyeed, taas oo uu kala baxda :-

B) Lo'da nuuc kasta leh ee D/Hoose iyo Ciidammada Asluubta Soomaaliyeed.

T) Xeryaha Lo'da Yaaqshiid iyo Wadajir.

J) Beerta Daaqa Warmaxan (Tixsiile) iyo Beerta, daaqa Jambaluul.

X) Shaqaalaha hadda ka shaqeeya Maamulada lo'da Ciidammada Asluubta iyo D/Hoose ee Muqdisho.

kh) Qalabka Xafiisyada iyo Gaadiidka Hadda loogu isticmaalo Maamulida lo'da.

2) Mashruucu wuxuu maamul ahaan hoos imaan doonaa ciidammada Asluubta Soomaaliyeed iyo D/Hoose ee Muqdisho, wuxuuna yeelan doonaa jiritaan; shaqsiyad iyo astaan u gaar ah, kuna dhaqmo doona Sharcigan iyo Xeerarka u degsan Mashruucyada Dawladda iyo Wakaaladaha Madax Banaan.

## QODOBKA 2AAD

## UJEEDADA MASHRUUCA

Himilooyinka Aasaasiga ah ee laga sugayo Mashruuca waa kuwan soo socda :

1) In si looga Guuleysto dhibaatada Magaalada Muqdisho, D.Hoose iyo tan Ciidammada Asluubta Soomaaliyeed ka haysta cad iyo Caano la'aanta uu mideeyo lo'da kaddibna cilmi baaris ku sameeyo sidii Magaaladani u gaari lahayd isku filaasho la xiriirta Nafciga lo'da, isla markaasna Mashruucu uu qayb weyn uga qaadan lahaa Horumarinta Xoolaha Dalka.

2) In Asagoo ka faa'iideysanaya habka Casriga ee Xoolo dhaqashada oo ah «Dhalan Rogidda», quud siinta, daawaynta iyo xannaanaynta uu sare u qaado wax soo saarka Lo'da si lo'deennu nafci ahaan ay ula loolanto lo'da Dunida.

3) In Mashruucu noqdo rug tijaabo, barnaamijyo Tusaale (Extension Programme) ahna uu u fidiyo Lo'da badan ee ku kala firrirsan Degmooyinka Gobolka Banaadir oo aan tayo ahaan dhiiqin cad iyo Caano toona.

4) In Mashruucu ku talo galo qorshe cad ee wax lagaga qaban karo Ururinta, casriyeynta Dhaqaalaha lo'da ku dhaqan Magaalada Muqdisho, taas oo halis ku ah quruxda Magaaladan iyo Caafimaadka Ummadda ku nool Gobolka Banaadir

QODOBKA 3AAD

AWOODDA IYO XUQUUQDA MASHRUUCA

1) Mashruucu wuxuu awood buuxda u yeelan doonaa Fulinta ujeeddooyinkii loo abuuray, asagoo mar walbana dhowri doona, kuna dhaqmi doona sharcigan, Shuruucda u degsan Wakaaladaha Madaxa Banaan iyo Mabaa'iida Guud ee saamaysa Maamulka.

2) Yeelan doonaa awood uu ku saxiixo heshiisyada la xiriira hawlihiisa, ayadoo mar walbana lagala tashan doono guddiga Siyaasadda Mashruuca ee ku xusan Qodobka 5aad ee sharcigan;

QODOBKA 4AAD

XARUNTA MASHRUUCA

Mashruuca Xaruntiisu waxay ahaan doontaa Magaalada Muqdisho haddiise dantu u baahnaato wuxuu laamo ka furan karaa meelo ka baxsan Magaalada Muqdisho.

QODOBKA 5AAD

KORMEERKA GUUD

1) Mashruucu wuxuu hoos imaan doonaa Maamulka Dowlada Hoose ee Muqdisho iyo Ciidammadda Asluubta

Soomaaliyeed, waxaana awoodiisa kormeerka yeelan doona Guddiga Siyaasadda oo xubnihiisa ka kooban yihiin sida soo socota :

B) «Duqa Magaalada Muqdisho» Guddoomiye.
T) «Taliyaha Ciidammada A. Soomaaliyeed G. ku xigeen.
J) iyo Xubin Guddigu Magacawdo

2) Guddiga Siyaasaddu wuxuu awood buuxda u yeelan doonaa in uu guddiga Maamulka toos u siiyo wax allaale wixii awaamiir, talooyin iyo Tillaabo kastoo waxtar u leh horumarinta Mashruuca.

## QODOBKA 6AAD

## GUDDIGA MAAMULKA

Guddiga Maamulku wuxuu ka koobmaa xubnaha hoos ku qoran :

| | | |
|---|---|---|
| 1) | Maareeyaha Mashruuca | Guddoomiye |
| 2) | Taliyaha Hoggaanka Dhaqaalaha | Xubin |
| 3) | KU/HA Duqa ee Maaliyadda iyo Warsh. | Xubin |
| 4) | Agaasimaha Waaxda Qarshaha D/Hoose | Xubin |
| 5) | Taliyaha H. Qorsheynta Ciidanka Asluubta | Xubin |

## QODOBKA 7AAD

## AWOODA IYO XILKA GUDDIGA MAAMULKA

1) In ay talo ka dhiibtaan wax allaale wixii la xiriira Cusub dejin ama wax ku kordhin, wax ka dhimid iyo baabi'in Xeerarka, nidaamyada iyo Amrada Saameeya Mashruuca Caanaha Banaadir.

2) In ay Go'aamiyaan wax alaale wixii hawl ah ee duruuf ahaan lagama maar maan u ah go'aan ka gaaridda guddiga Maamulka.

3) In ay hubiyaan fulitaanka dhammaan hawlaha Mashruuca.

4) In ay guddi u Magacaabaan Arrimaha Qandaraasyada ee la soo gudboonaada Mashruuca.

5) In ay talo ka dhiibtaan Xisaab xirka Sannadka ee Mashruuca.

QODOBKA 8AAD

Guddiga si uu u guto Waajibaadkiisa, isla markaasna u daryeelo danaha guudnimo waa in uu muddo aan ka yarayn bishiiba laba goor ka fariista hawlaha hor yaal ee Socdsiintoodu ku xiran tahay Go'aanka Gaaridda Guddiga, haddii arrin Xallinteedu deg-deg tahay ay la soo gudboonaato, Guddoomiyaha wuxuu awoodi karaa in uu xubnaha intooda kale isugu yeero kulan aan fadhigiisu caadi ahayn.

Mashruuca waxaa Madax noqon doona Maareeye Guud, isla markaasna yeelan doona Waaxyo, Xubno, Laamo iyo Faracyo fuliya Maamulka Mashruuca oo idil.

QAABKA MASHRUUCA

QODOBKA 9AAD

MAGACAABIDDA IYO XILKA MAAREEYAHA

Maareeyaha Mashruuca waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu soo saxiixo Madaxweynaha J. D. S. isagoo dhegaystay talo jeedinta Guddiga Siyaasadda Mashruuca.

QODOBKA 10AAD

Maareeyaha Guud ee Mashruuca wuxuu yeelan doonaa awoodda iyo mas'uuliyad la siman tan Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraddaha sida ku qeexan qodobka 3aad ee xeerka Lamb. yahay 316 ee 17. 12. 1972, oo ah sida soo socoto :

1) In uu Saxiixo Heshiisyada Mashruucu dhan ka yahay, isagoo oggolaasho ka haysta Guddiga Siyaasadda.

2) Mas'uulka yahay Habka Maamulka Shaqada Mashruu

ca, wuxuuna awood u yeelan doonaa in uu sameeyo waxallaale wixii qaraar ah ee ku saabsan Maamulka iyo Caannaanta Shaqaalaha.

3) In uu ku dhaqaaqo wixii qaraar deg deg ah, isagoo isla markaasna ogeysiinayaa Guddiga Siyaasadda Mashruuca.

4) In uu bixiyo Amaah lagama maar maan ah si hawsha maamulka iyo xisaabaadkuba ugu socdaan hab wanaagsan.

5) In uu fuliyo hawl maalmeedka shaqada Mashruuca, isagoo oggolaasho qoraal ah ka haysta Guddiga Siyaasadda.

## QODOBKA 11AAD

Xuquuqda Qaynuuniga iyo Dhaqaale ee Shaqaalaha Mashruuca

1) Xuquuqda Qaynuuniga iyo tan Dhaqaale ee Maareeyaha Guud Agaasimayaasha iyo Shaqaalaha kale ee Mashruuca waxaa kukumi doonaa Xeerka Lamb. yahay. 36 ee 22. 4. 1972, kuna saabsan Shaqaalaha Wakaaladdaha Madax Banaan.

2) Xuquuqda Shaqaalaha ka tirsan Maamulidii hore ee Lo'da, waxaa laga billaabo maalinta Sharciga dhaqan galo lagu wareejin doonaa Mashruuca Caanaha Banaadir, iyadoo loo Aqoonsaday in Shaqadoodii hore ay ay tahay mid sii socota laga bilaabo Maalinta Qofka la qoray, waxayna dhanka xuquuqda iyo Dhaqaalahaba la mid yihiin in Shaqaalaha Mashruucu qortay.

## QODOBKA 12AAD

## QAAB GAAR AH

Mashruucu wuxuu yeelan qaab gaar ahaaneed oo Dhismahiisa la xa xiriira, waxaana lagu soo saari doonaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. isagoo dhegaystay tala jeedinta

Guddiga Siyaasadda, waana in lagu sameeyaa muddo ku siman 5 Bilood gudahood laga billaabo Maalinta Sharcigani dhaqan galo.

### QODOBKA 13AAD

### HANTIDA MASHRUUCA

Hantida mashruucu waxay ka koobantaa :

1) Lacagta u kaydsan socodsiinta Maamulka Lo'da Dawladda Hoose ee Muqdisho iyo Lo'da Ciidammada Asluubta Soomaaliyeed iyo wax allaale wixii mood iyo nool ee hadda jira.

2) Lacag maal-gelin ah oo ay wadajir u bixiyaan D/Hoose ee Muqdisho iyo Ciidammadda Asluubta Soomaaliyeed, taas oo loogu tala galaayo hirgelinta iyo Mirro ka dhalinta Mashruuca Dhinacyadu Hay'aduhu ku shirkoobeen (Joint Venture 50%).

3) Lacagta ka soo geli doontaa libka Caanaha iyo Lo'da.

4) Mucaawinooyinka ka soo gala Hay'adaha Caalamiga iyo Gudaha.

### QODOBKA 14AAD

### AMAAH SHARCI AH :

1) Mashruucu si uu u guto xilkiisa, wuxuu lacag ama qalab ka amaahsan karaa bangiyada Dawladda iyo Meelihii kaloo ku habboon, isagoo Oggolaasho ka haysta Guddiga Siyaasadda.
2) Markii amaah lagala xaajoonayo bangiyada Dibadda ama Hay'ado Caalami ah, mashruucu wuxuu sharci ahaan ka wakiil noqon karaa Dawladda Soomaaliyeed.

### QODOBKA 16AAD

### XISAABTA SANNADKA

Xisaabta Sannadku waxay ka billaabanaysaa 1da Jannaa-
yo, waxayna ku dhammaanaysaa 31ka Diisembar ee Sannad wal-

## QODOBKA 16AAD

## MIISAANIYADDA MASHRUUCA

1) Miisaaniyadda Socota (Preventivo).

Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Bisha Oktoober ama inta ka horeeysa ee Sannad walba, waa in uu isku dubbariddaa Miisaaniyadda caadiga ah iyo tan Horumarinta ee sannadka soo socda, isagoo faafinaaya kuna muujinayaa lacagta soo geli doontaa ama ka bixi doontaa mashruuca Sannadka soo socda, wuxuuna hor dhigi doonaa si loo oggolaado Guddiga Maamulka iyo Siyaasadda oo iyaguna u sii gudbin doonaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

2) Xiritaanka Miisaaniyadda (Consuntivo)

Maareeyaha guud marka ay tahay 31ka Bisha Maarso ama inta ka horeeysa ee Sannad walba, waa in uu isku dhubbaridda xiritaanka Miisaaniyadda Sannadka la soo dhaafay, isagoo hagaajinaya xisaabaadka sannadka iyo Bandhigida macaashka iyo Khasaaraha Mashruuca una gudbiyaa Guddiyada Maamulka iyo Siyaasadda oo u sii gudbin doonaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Wasiirka Wasaarada Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay isagoo la tashanayaa guddiga Siyaasadda in uu oggolaado xiritaanka Miisaaniyadda, wuxuuna amri karaa in lagu qoro faahfaahinta Rasmiga ah ee dalka, iyadoo kharashka uu bixinaayo Mashruuca Caanaha Banaadir.

## QODOBKA 17AAD

Xisaabaadka Mashruuca waxaa loo wadayaa habka ay tilmaamayaan Sharciyada iyo Xeerarka ay dawladdu u dejisay Maamulka Xisaabaadka.

## QODOBKA 18AAD

Xisaabaadka Mashruuca waxaa baaraya Hanti Dhawrka Guud ee Qaranka Soomaaliyeed.

## QODOBKA 19AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa maalinta uu ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26 Dis. 1979

J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

## QAYBTA LABAAD

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD L. 16 ee 8 Nofeember 1975 Cad dhul Dawladeed, gadatay Jaalle Cawrala Faarax Cilmi — ku yaal Muqdisho — Jidka Maka Al Mukarrama Xaafadda Hawl-Wadaag, kuna fadhiya mq. 1.168.

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA.

ISAGA OO ARKAY : Warqaddii Koomaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO OO ARKAY : Xeer lamb. 41 soona baxay 1. Nofeember 1973;

ISAGOO OO ARKAY : Xeer lamb. 144 soona baxay 23 Maajo 1961;

ISAGOO OO ARKAY : Arjigii uu keensaday Xaaji Maxamed Gurra, taariikhdu markay ahayd 31 Maarso 1958, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed, ku yaal Muqdisho — Jidka Maka Al Mukarrama — Xaafadda Hawl-Wadaag — kuna dhacaaya qaybta Vaad;

ISAGOO OO AQOONSAN : Nadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, lamb. 4 soona baxday 1. 10. 1960, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO OO ARKAY : Naqshadda lamb. 15200, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dawladda Hoose ee Muqdisho — fadhigoodii 342aad taariikhduna ahayd 6 Oktoobar 1964, kuna fadhiya mq. 1.168;

ISAGOO OO ARKAY : Naqshadda lamb. 113 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 15200 laguna aqoonsaday fadhigii 29aad ee Guddiga dhismaha Dawladda Hoose, taariikhdu markay hayd 2. 7. 1975, kuna saabsaneed dhismo Hoteel Cusub «Sawooya»;

ISAGOO OO ARKAY : Bolleetada lamb. 31012 ee 15. 11. 1964, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Xaaji Maxamed Gurra uu bixiyey lacag dhan Sh. S0. 2.336/ kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO OO AQOONSAN : Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.168 loona tiriyey Xaaji Maxamed Gurra sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeedun ahayd 9 Diseember 1964;

ISAGOO OO ARKAY : Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameysa dhulka isaga ah;

ISAGOO OO ARKAY : Qoraal (Atto) lmb. 1052 Reb. taariikh 10 Agoosto 1964 Qoraal Dawladeed oo ah caddeynta Garsooraha Sheekh Xuseen Sheekh Abuubaker taas oo Cabdi Cilmi Cabdulqaadir oo u Wakiil Xaaji Maxamed Gurra, Cabdulle — wuxuu ka geday kuna wareejiyey wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1168 kuna yaal Muqdisho — Jidka Maka Al Mukarama — Xaafadda Hawl — Wadaag

ISAGOO OO ARKAY : Qoraal (ATTO) lamb. 6859 Rep. taariikh 21 Oktoobar 1964 lagu diiwaan geliyey Xamar 22.10.64 1.833 Qoraal Dawladeed, Buugga 5 oo ah caddeynta Notaayaha Dr. Maxamed Warsame Cali Danet, taas oo Maxamed Ugaas Aaden Xaashi ka gaday kuna wareejiyey Khadiija Faarax Cali, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.168 kuna yaal Muqdisho — Jidka Maka kuna yaal Muqdisho — Jidka Maka Al Mukarama — Xaafadda Hawl-Wadaag.

ISAGOO OO ARKAY : Qoraal (ATTO) lamb. 3231 Rep. Taariikh 18 Nofeember 1974 lagu diiwaan geliyey Xamar 19. 11. 1974 1.334 Atti Pubblici Vol. 20 oo ah Caddeynta Notaayada Dr. Maxamed Xasan Jasti, taas oo Khadiija Faarax Cali ka gaday kuna wareejisay Cawrala Faarax Cilmi wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismahii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.1.168 kuna yaal Muqdisho — Jidka Maka Al Mukarrama — Xaafadda Hawl-Wadaag

## X *E* E *R*

Waxaa cad dhul Dawladeed ah la siiyey Cawrala Faarax Cilmi oo ku yaal Muqdisho — Jidka Maka Mukarrama — Xaafadda Hawl Wadaag, kuna fadhiya mq. 1.168

Muqdisho, 8 Nofeember 1975

*XOGHAYAHA*

*WASAARADDA HAWLAHA GUUD*
*INJ.* **MAXAMED XAWAADLE MADAR**